



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

Ku Socota waalidiinta/mas'uuliyiinta ay carruurtoodu raacayaan gaadiidka baska dugsiga:

Warqadaan aad helaysaa waa sugid amaan sababtoo ah nadaamka Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis waxa uu siinayaa gaadiidka bas ubadkaga ee u raacayaan dugsiga ama ka soo raacayaan dugsiga. Badbaadada ardaydu waa mudnaantayada koowaad waxaana aanu dejinay xeerar iyo nidaamyo loogu talagalay in lagu ilaaliyo daryeelka carruurta. Ilmo kasta, iyadoon loo eegin da'da, ayaa mas'uul ka ah raacitaanka xeerarkan. Waxaan kaa codsaneynaa inaad ka caawiso cunugaada inuu garto in anshax-xumada, taxadar la'aanta ama feker la'aanta, ay keeni karto dhaawac halis ah naftooda ama rakaabka kale. Fadlan si taxadar leh ula eeg ilmahaaga xeerarka badbaadada ee hoos ku qoran.

Waalidiinta waxaa la xasuusinayaa in ardayda iyo shaqaalaha baska ay u xilsaartay maamulka dugsiga kaliya la qaadi karo. Ardayda ka hor-kindergarten, kindergarten iyo fasalka koowaad waa in ay had iyo jeer xidhaan calaamado magac marka ay raacayaan baska. Calaamadaha magaca waxaa laga yaabaa in laga helo dugsigaaga.

Xeerarka Badbaadada Baska Dugsiga

- Ka fogow "Aagagga Khatarta ah" ee baska ka baxsan.
- Raac tilmaamaha darawalka.
- Ku imoow Waqtiga loogu talo galay.
- Fadhiiso Had iyo jeer.
- Xushmad le noqo. Ha dagaalamin, cay iyo qaylo.
- Ha ku dhex cunin ama cabbin.
- Baskaaga nadiifi. Ha dhaawicin baska.
- Madaxaaga iyo gacmahaaga ku dhowr gudaha daaqadaha baska.
- Ha soo qaadan shay khatar ah ama xayawaan rabaayad ah.
- Daaqadaha waxaa laga yaabaa inaysan furmeeynin ilaa iyo kala barka.

Waxaan ognahay in waalidiinta/mas'uuliyiinta ay fahmeen in ay la wadaagaan mas'uuliyadda canugga asluubtiisa marka ay saaran yihiin baska dugsiga iyo baska dugsiga raacidiisa iyo dejinta. Iyadoo ay tahay xalka ugu dambeeya, ardayda ku lug yeelata shilalka halista ah ama soo noqnoqda waa loo diidi doonaa gaadiidka. Waalidiinta/masuuliyiinta mar walba waa la ogeysiiyaa haddii ardaygu luminayo mudnaantan. Waad ku mahadsan tahay wada shaqayntiina. Dhaqanka wanaagsan had iyo jeer waa xeerka ugu horreeya ee badbaadada.

Kormeeraha Guud ee Dugsiyada

(Fadlan saxiix qaybtan warqadda oo kula soo noqo dugsiga ilmahaaga.)

KU socda MAAMULAHA:

Waan akhriyay warqaddan oo aan kala hadlay sharciyada ilmahayga _____
(magaca hore & magaca dambe)

Waxaan arkayaa in isaga/iyada ay fahmayaan oo ay adeecsan yihiin sharciyadan.

Taariikhda

Saxiixa Waalidka/Masuulka

Dugsiga